



Bayaanka Saameynta Sinnaanta: Qorshaynta Green New Deal

Cinwa

anka: Qorshaynta Green New Deal

Taariikhda:

Oktoobar 26, 2022

Miyaa [Racial Equity Planning Tool](#) la isticmaalay? X Haa Maya

Hadday haa tahay, geli taariikhda(yada) shirarka REPT oo isku xidhka REPT ee dhammaystiran halkan: [Ogosto 24, 2022](#)

[Agabka Qorshaynta Sinaanta Jinsiga ee la Dhamaystiray](#)

Xubin ka tirsan Qaybta Sinnaanta, Istaraatiijiyada iyo Nusqaamaha Fursadaha miyuu dib u eegay bayaankan? X Haa

Maya

Qaybaha Habka Qorshaynta Sinnaanta Midabka Jinsiga BPS	Si Kooban/Sababta
<p>1. Qalqaalo/Soojeedin & Saamaynta <i>Waa maxay natiijooyinka la rabo ee codsiyada/dadaalada, oo ay ku jiraan ka saarida meesha khilaafka? Yaa horseeday shaqadan/qorshaynta, oo miyay ka tarjumayaan aqoonsiga kooxda ardayda BPS iyo qoysaska (kooxaha muhiimka ah waxaa ka mid ah shakhsiyadka madow, Latinx, Aasiyaan, asal ahaan, soo galooti, luqado badan, oo leh khibrad Waxbarasho Gaar ah)?</i></p>	<p>Soo jeedintu waa in la sameeyo bhabraac cusub oo loogu talagalay qorshaynta istaraatiijiyadeed ee mashaariicda waaweyn ee magaalada. Habraacan afarta waji ah waxaa loo hirgelin doonaa FY24 meertada qorshaynta raasamaalka, oo ay ku jiraan fikirka, dib u eegista hogaanka, toosinta, iyo abaabulka.</p> <p>Mashruuca reen New Deal oo kaashanaya waaxyaha kala duwan ee BPS, waaxyaha Magaalada Boston, Xafiiska Duqa Magaalada, iyo daneeyayaasha kale ee ay khusayso. Hawlgallada DDB oo ay weheliyaan Hawlgallada Magaalada Boston ayaa hogaaminaya qorshaynta ka dambaysa dadaalkan. Qorshuhu wuxuu salka ku hayaa aragtida tacliimeed ee degmada iyo baahiyaha barnaamijka. Wakiilada BPS iyo Qaybaha Waxbarashada iyo Dugsiyada ayaa lagama maarmaan u ah hindisaha.</p> <p>Kooxdan waxaa ku jira dad Madow ah, Afrikaan Laatin ah, Aasiyaan, iyo Cadaan, waxaan rajeyneynaa inaan ballaarino ka qaybgalka daneeyayaasha inta aan sii wadno.</p>
<p>2. La jaanqaadida Qorshaha Istaraatiijiga ah <i>Sidee baa qorshaha istaraatiijiga degmadu u waafaqsan yahay codsiga/dadaalka?</i></p>	<p>Habraacan wuxuu la jaan qaadayaa go'aanka istaraatiijiyadeed ee degmada si ay u siiso dhammaan ardayda Dammaanad Tayo oo ay ku jiraan dhismayaal cusub, dib u cusboonaysiin, adkaynta hababka la saadaalin karo, iyo isku darka bulshooyinka dugsiga. Habraaca Qorshaynta magaalada FY24 waxa uu abuurayaa qorshe hawleed dhismayaal cusub iyo mashaariic kale oo waaweyn.</p>
<p>3. Falanqaynta Xogta <i>Xogtee ayaa la falanqeyey? Miyaa lagula kala saaray jinsiga iyo kooxa kale? Maxay muujisay oo khuseysa kala duwanaanshaha?</i></p>	<p>Nidaamka Qorshaynta raasumaalka FY24 waxa dhaqaajiyaa xogta soo socota:</p> <ul style="list-style-type: none">• Saadaasha Diiwaangelinta (Waaxda Qorshaynta iyo Falanqaynta BPS)• Xaaladaha Dhisitaanka (Bixinta Dhamaan macluumaadka BPS)• Waaxda Xarumaha Dadweynaha ee Magaalada Boston talooyinka horumarka ilaa hadda mashaariicda hadda ay waaxdoodu leedahay• Tasmada Fursadaha BPS, taas oo tilmaamaya saamiga ardayda baahida sare leh ee dugsi kasta <p>Iyadoo la tixgelinayo arimaha jinsiyadda iyo noocyada kale ee sinaanta ay had iyo jeer udub dhexaad u yihiin shaqadeena, inta badan mashaariicda raasumaalka ah ayaa la kala hormariyaa iyadoo lagu saleynayo arrimo kale oo macnaha guud ah, sida isbeddelada isdiiwaangelinta, xaaladaha</p>

	dhismaha ee hadda, qaabeynta dugsiga iyo waddooyinka, baahiyaha tacliinta, talada hoggaamiyaha dugsiga, iyo helitaanka meel lulid. Nidaamka Qorshayntu waxa uu abuuri doonaa qorshe hawleed kaas oo ku dari doona arrimahan, tabashooyinka sinnaanta, iyo fikrado ballaadhan oo loo dhan yahay oo ka imanaya bulshooyinka dugsiga.
<p>4. Hawlgelinta Daneeyayaasha <i>Yaa ka shaqeeyey (tirada, kooxaha muhiimka ah, iyo doorarka) iyo sida, iyo waxa natiijadu noqotay? Maxaa ardayda/qoysaska inta ugu badan saameeyey codsigan/dadaalkan?</i></p>	Hawlgallada Magaalada Boston iyo Waaxyaha Adeegyada Dadweynaha iyo Guddoomiyaha Guddida Dugsiga ayaa hawshan ku hawlanaa oo ay weheliyaan waaxyaha kala duwan ee BPS. Marka aan bilaabayno habka qorshaynta, daneeyayaasha dheeraadka ah ee ka baxsan iyo bulshada dugsiga ayaa si fiican looga hawl gali doonaa, gaar ahaan aragtida ardayda iyo qoysaska ka soo jeeda kooxaha dhaqan ahaan la gacan bidixeeyo.
<p>5. Keeladaha Sinaanta Jinsiga <i>Sidee ayuu codsigan/dadaalkan u yareeyey kala duwanaanshaha una kordhiyey jinsiga iyo saamiga kale? Waa maxay cawaaqibta aan lagu talo galin ee macquulka ah? Istaraatiijayadehee ayaa kor u qaadaya saamiga?</i></p>	<p>Dhisme kasta oo cusub iyo casriyeyn kasta waxa uu hiigsanayaa in la xidho daldaloolada fursadaha iyada oo la siinayo ardayda BPS dugsiyada qarniga 21aad. Inta badan ee suurtoogalka ah, mashaariicda waxaa lagu kala hormarin doonaa taxliilinta sinaanta. Habka Qorshaynta raasumaalka waxa uu dhimaya kala duwanaanshaha jinsiyadeed iyo kuwa kale iyada oo loo marayo:</p> <ol style="list-style-type: none"> 1) Horudhac ka qaybgalinta, adag, ee loo dhan yahay oo lala yeesho ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha, gaar ahaan bulshooyinka dugsiga ee saamaynta ugu wayn leh, 2) Waqti ku habboon, xiriir hufan oo lala yeesho bulshada dugsiga iyo daneeyayaasha kale, iyo 3) Jadwal cad oo qaab-dhismeedka isla xisaabtanka, oo ay ku jiraan mareegaha ujeedooyinka iyo warbixinnada horumarka leh.
<p>6. Miisaaniyada & Hirgelinta <i>Waa maxay saameynta miisaaniyadu? Sidee hirgelintu u xaqiijinaysaa in dhammaan ujeedooyinka, gaar ahaan ujeedooyinka la xidhiidha sinnaanta, la gaadhay? Waa maxay kooxaha aqoonsiga kale ee kooxda hirgalita, oo miyey eegi doonaan saamiga?</i></p>	<p>FY 24 talooyinka Qorshaynta raasumaalka waxay yeelan doonaan saamayn miisaaniyadeed weyn. Miisaaniyado gaar ah oo maalgashi ayaa la wadaagi doonaa bilaha soo socda iyo sanadaha soo socda marka mashaariicda la xusho lana naqshadeeyo.</p> <p>Hirgelintu waxay hubin doontaa in ujeedooyinka sinnaanta la buuxiyo iyadoo la baarayo xogta muhiimka ah si loo ogeysiyo go'aan gaarista, iyo iyadoo la ururinayo aragtiyo kala duwan xubnaha guddiga, hoggaanka, iyo gaar ahaan bulshada dugsiga. Kooxda qorshayntu waxay matalaysaa waaxyo badan oo BPS iyo Magaalada Boston ah, waxayna si isa soo taraysa uga tarjumaysa tirada ardayda BPS iyo qoyska.</p>
<p>7. Islaxisaabtanka & Isgaarsiinta <i>Sidee ayaa sameeynta loo qiimeyn doonaa, qori doonaa looguna gudbin doonaa daneeyayaasha? Yaa ka masuul noqon doona?</i></p>	Kooxda Qorshaynta raasumaalka ayaa hadda ururinaysa oo dib u eegis ku samaynaysa xogta muhiimka ah waxayna la shaqaynaysaa Horumarinta Qoyska ee BPS si ay u ururiyaan sahannada qoyska. Waxaa naga go'an inaan ka qayb-qaadanno bulshada dugsi kasta oo ay saamaysay ka hor intaan u gudbin hindisaha mashruuca raasumaalka ah, oo aan ku darin ra'yigooda, oo aanu rajaynayno inaan daahfurno dashboard-ka khadka tooska ah iyo bandhigyada dadweynaha mustaqbalka ee ku saabsan horumarkayaga.